

Gargaarada Cuntada oo loogu talagalay Qoysaska Inta lagu jiro Xiritaanka Dugsiga

EBT Cudurka Baahsan (P-EBT) ayaa taageero dhaqaale siiya qoysaska si loo daboolo kharashyada cuntooyinka dukaanka laga soo gato inta uu dugsigu xiran yahay. Gargaarkani waxaa la siiyaa DHAMMAAN qoysaska carruurtoodu ay helaan cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay ee ka jira Oregon.

Cidmaa u qalanta?

Guri kasta oo leh carruur, haddii aanan loogu talgalin xiritaanka dugsiyada inta lagu jiro dillaaca COVID19, wuxuu heli doonaa cuntooyin lacag la'aan ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay iyada oo loo marayo dugsigooda. Tani waxaa ka mid ah qoyska leh carruur isqortay dugsiga K-12, barnaamijka dugsiga hortii ku saleysan, ama dugsiga ku saleysan Headstart ee sida caadiga uga qayb qaata Barnaamijka Qadada Qaranka ee Dugsiga. Qoysasku waxay heli karaan EBT Cudurka Baahsan iyo habka qaadashada iyo tegista "grab and go" ee cuntooyinka la diyaariyay ee dugsiyadu bixiyaan labadoodaba inta lagu jiro cudurka baahsan. P-EBT sidoo kale waa gargaaro ka gooni ah gargaarada degdega ah ee SNAP ee dheeraadka ah ee sida buuxda hadda la isku siiyo iyada oo qoysaska u qalmaa ay heli doonaan labadoodaba.

Xaalada deganaansho dhibaato ma lahan marka la eego EBT Cudurka Baahsan. EBT Cudurka Baahsan looma xisaabin doono daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge'.

Waa immisa gargaarku?

Gargaarku wuxuu u dhigmaa qiimaha cuntooyin dugsiga ee muddo bil ah wax shaqo ahna kuma laha haddii aad u qalanto heerka Lacag la'aanta ah "Free" ama Qiimaheeda hoos loo dhigay "Reduced". Gargaarada bil kastaa waa:

Maarso = \$69 ilmihiiiba

Abriil = \$126 ilmihiiiba

Maajo = \$120 ilmihiiiba

Juun = \$69 ilmihiiiba

Sidee ayay u shaqeyn doontaa?

Gargaarada waxaa la bixiyaa iyada oo la adeegsanayo kaarka EBT oo la siiyo ma'suulka guriga. Wuxuu u shaqeeyaa sida kaarka deynta 'credit card' si cunto dukaanka looga soo gato. Haddii uu qoyskaagu helo SNAP, gargaarada EBT Cudurka Baahsan waxaa lagu dari doonaa kaarka EBT ee aad isla hadaba u isticmaasho SNAP. Haddii uu qoyskaagu aanu helin SNAP, kaarka EBT ayaa boosta laguugu soo diri doonaa. Inkasta oo EBT Cudurka Baahsan uu isticmaalo nooca kaarka oo la mid ah SNAP, EBT Cudurka Baahsan MA AHA gargaarada SNAP loomana tixgelinayo in uu yahay daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge'.



Maxaan sameeyaa si aan u helo EBT Cudurka Baahsan?

Qoysas badan ayaa si toos ah u heli doona EBT Cudurka Baahsan.

Isla hadaba helaya SNAP? Lacag dheeraad ayaa si toos ah loogu shubi doonaa kaarkaaga Cayrta ee Oregon EBT.

Aanan lahayn SNAP, balse isla hadaba u qalma cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah ama qiimaheeda hoos loo dhigay? Kaarka cusub ee EBT ayaa si toos ah boosta laguugu soo diri doonaa oo ay la socdaan tilmaamo la raacayo. Xaqiiji in dugsigaagu leeyahay cinwaanka boostada oo cusub. Haddii dugsigaaga oo dhan helo cuntooyin lacag la'aan ah, waad u qalantaa sidoo kale. Inkasta oo EBT Cudurka Baahsan uu isticmaalo nooca kaarka oo la mid ah SNAP, EBT Cudurka Baahsan MA AHA gargaarada SNAP loomana tixgelinayo in uu yahay daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge'.

Aan hadda ka hor weligeed la helin SNAP ama cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay? Hab fudud oo loo helo gargaarka P-EBT waa iyada oo cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah laga codsado halkan: www.ode.state.or.us/apps/frlapp Helida gargaarada SNAP waxay sidoo kale kaa dhigi kartaa in aad u qalanto, halkan waxaa ku qoran sida loo codsado: govstatus.egov.com/or-dhs-benefits Waxaa si toos ah lagu siin karaa gargaarada EBT Cudurka Baahsan laga bilaabo bisha lagu ogolaado cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah ama SNAP midkood.

Ayaan la xiriiraa haddii aanan helin gargaar dheeraad ah?

Haddii aadan helin gargaaradan laakiin aad aamisan tahay in aad u qalanto, fadlan la xiriir EBTSchoolmeals@dhsosha.state.or.us

Halkan ka ogow waxyaalo dheeraad ah oo ku saabsan gargaarada cuntada lacag la'aanta ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay: <https://oregonhunger.org/free-school-meals/>.

Ogow waxyaalo dheeraad ah oo ku saabsan ilaha cuntada inta lagu jiro cudurka baahsan, oo ay ka mid tahay sida loo codsado SNAP iyo sida loo helo goobaha cuntada dugsiga inta lagu jiro xiritaanka: oregonhunger.org/covid-19 ama wac 2-1-1